

**Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka**

**19 Juun 1971, lamba. 167**

**Wax ka baddalka Dekeretdada Madaxweynaha lamba. 133 ee 10 Maajo 1971 “Dhismaha Maxkamadda Ciidamada oo xarunteesu tahay Hargeysa”**

**GUDDOOMIYAHA**

**GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda Koowaada Kacaankii 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay qod. 1 faqradda 2 ee ku saabsan Wax ka baddalka Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Xeer lamba. 20 Abriil 1970;  
Marka uu garowsaday baahida loo qabo in wax laga baddalo qod. 2 ee Dekereetada Madaxweynaha lamba. 133 ee 10 Maajo 1971;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Qod. 2 ee Dekeretada lamba. 133 ee 10 Maaj 1971, waxaa lagu baddalay sida soo socota:

**Qod. 2**

Maxkamadda Ciidamada ee ku xusan Qod. 1 ikhtisaaskeedu waa Gobollada Waqooyi Galbeed, Waqooyi Bari iyo Bari.

**Qod. 3**

Xeerkaan wuxuu dhaqngalayaa 20 Juun 1971.

Muqdisho, 19 Juun 1971.

Guddoomiyaha  
Golaha Sare Kacaanka  
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**